

U Qaybsanaha Qoysaska Afrikaanka ah ee “Family and Reproductive Rights Education Program” (FARREP)

Isbitaalka Mercy Hospital ee dumarka wuxuu leeyahay barnaamij si loo taageero:

- dumarka Afrikaanka ah iyo qoysaska inta lagu daryeelayo isbitaalka, ama
- dumarka ka yimid wadamada gudniinka dumarka marmar laga sameeyo.

U qaybsanaha Afrikaanka/FARREP ayaa awooda:

- Inay sharaxdo noocyada adeegyada kala duwan ee daryeelka aad heli karto intaan ilmuhu dhalan
- inay kula joogto waqtiga wada-hadalka si looga hadlo gudniinka
- inay ku barto adeegyada kale ee isbitaalka kuwaas oo laga yaabo inay ku caawimi karaan sida u-shaqeeyaha bulshada, dabiici ku daaweynta, nafaqa yaqaan ama waxbarashada sonkorawga,
- siinta talada ku haboon dhakhtarada, umulisooyinka, kalkaalisoooyinka caafimaadka iyo kuwa kale, si baahidaada caafimaadka si fiican loogu fahmo
- loogala hadlo welwelkaaga shaqaalaha isbitaalka hadaad u baahan tahay kaalmo intaas ka badan
- Inuu kaa caawimo inaad bixiso aragti ku saabsan daryeelkaaga isbitaalka
- in lagu siiyo macluumaad ku saabsan gudniinka dumarka ee Australia gudaheeda iyo waxyeelladiisa caafimaadka dumarka
- in la asaaso lana xoojiyo xiriirka bulshooyinka Afrikaanka ah iyo Isbitaalka Mercy Hospital for Women.

Adeegani Khasab maaha.

Fadlan u sheeg shaqaalahayaga haddii aad jeclaan lahayd kaalmada u qaybsanaha Afrikaanka/FARREP.

Haddii ay ku haboon tahay, shaqaalahayagu waxaa laga yaabaa inay ku weyddiyaan inaad hesho kaalmadayada. Haddi kale, Waxaad la hadli kartaa u qaybsanaha Afrikaanka tel: 8458 4150.

Macluumaad intaas ka badan

Haddii aad qabto wax su'aalla oo khusaysa macluumaadkaan, fadlan la xiriir:

Isbitaalka Dumarka ee Mercy Hospital

U qaybsanaha FARREP/Afrikaanka
Tel: 03 8458 4150

Aqoonsi

Waxaa sameeyey: Multicultural Services

Waqtiga la sameeyey: Febraayo 2020

Taariikhda dib-loo-eegay: Febraayo 2022